DegmadaYDRE

Degmada YDRE waxey Ogeysiinaysaa 8\4

Caaboqa Karooina: maxaan qabanaa anaga?

Degmada ydre waxey lasocota horumarinta xaalada cudurka karoona fayruus iyo wexey ugana shaqeysaa si firfircooni ah hawlaha degmada waane in raad ku yeelata sida uga yar ee suurta gal ah haddi ay ka dhacdo cudur faafit degmada ydre gudaheeda.
Waxaan xiriir la leenahay si joogta ah mas'uulada hey'adaha waane raacna qiimeyntooda iyo talooyinkooda.

- Fariin Guud : cudurka wuxu ku faafaya hadda bulshada swiidishka dhexdeeda gaar ahaan magaalooyika waaweyn xitta sidoo kale gobalka (Östergötland) ,waa muhiim in dhamaanteena is caawino sidii aan uga hortagi laheyn faafitaanka cudurka si dad badan aysan u xanuunsan isla waqtigaas.
- waxaan u baahanahay in aan caawino kuwa bulshada ugu nugulsan , waayeeladeena iyo bukaanka . Ka fogow booqooyinka aan loo baahnayn in la booqdo waayeelada bukaanka .Feejiqnow iyo xasuuso in covid -19 sababi karo astaamo fudud oo la mid ah hargab.
  Dadka waaweyn iyo carrurta oo dareemayaan diif,qufac ama qandho waa in ey joogaan gurayahooda , xitta hadey la kulamaan astaamo fudud. Guriga joog ilaa aad ka caafimaadid iyo laba maalmood oo dheeraad ah ku darso. Sidaan ayaan uga hortagi karna isku daarinta cudurka iyo waxaan isku kaashan karna si aan u xaddid laheyn faafitaanka cudurka. Haddi aad dareemaysid caafimaad uma baahnid in aad guriga joogtid xitta haddi add la nooshahay qof hargabsan.
- Xaaladaha welwelka waxaa muhiim ah in la raaco macluumaadka oo saxda ah oo soo saartay hey'ada caafimaadka , waa in is caawina sida aan uga hortagi laheyn wararka oo beenta ah. Fadlan haa la wadaagin macluumaadka aan aamin aheyn.

Hoggaamiyaha degmada : subax walba waxaa kulmaa maareynta degmada iyo maamulayaasha degmada waxey kawarbixinayaan howlaha ka sacdo degmada wxeyna dabagal ku sameeyaan xaalada shaqaalaha ey mareyso iyo si go'aaman uga gaaraan haddi loo baahdo in loo gudbio maamulayaasha iyo shaqaalaha.
Maareeynta degmada iskaashi bey la leeyihiin gobalka (Östergötland) iyo maamul gobaleedka si ey isku gudbin lahaayeen macluumaadka eena uga hortagi lahaayeen faafitaanka cudurka . Su'aalaha ku saabsan daryeelka caafimaadka , qalabka difaaca , wax ka qabashda ganacsiga iyo macluumaadka ayaa had iyo jeer ku jiraan ajandaheena.

wax soo saarka ganacsiga iyo ururaha jaaliyadaha :

mas'uuliinta ganacsiga waxey la xiriiraan shirkadaha waxeyna u soo jeediyaan talooyiin, waaniyo iyo kaalmo , waxey la sameeyeen xariiryo ku saabsan waxqabashadi ay sameeyeen dhanka karoona fayruus , waxeyna ka hadlayn tababarka, nidaaminta iyo Kulamada kale .Su'aalo kale loo jeediyay oo ku saabsan kaalmoyiinka ey siinkarto degmada ydre shirkadahaas.

Dhaqanka

- Maktabada : waxey bixisaa buugaag oo amaah ah weyna sii dheereysi muddada amaaha . Borogaraamkaas waxaa loo yaqaana (Take Away)
- daraasad bey ku suubineysaa si loo fulin lahaa howlaha kala duwan si loo isticmaalo nidaamka dijitaalka. waxeyna ku casuumi doontaa xilliga fasaxa (påsklov) brograamka (Take Away)si wax loga akhristo.
- waxey faafinaysaa macluumaadka oo ku saabsan adeega maktabada ey u bixiso dijitaal ahaan tusaale ahaan buugaagta elektaroonigga ah, buugaagta maqalka elektaroonigga ah iyo filimo qulqulayaan.(durdur ah)
- in ey bixiso talooyiin si guriga loga akhristo joornalada iyo joornaal xilliyeedyada.

maareynta bulshda : waa mamnuuc in la booqdo (solängen) si loo yareeyo faafida cudurka iyo si aa u ilaalino waayeelkeena . Degmada (YDRE) ilaa iyo hadda si fiican bey uga babaaday (COVID -19) marka waa muhiim in dhamaanteena aan ka taxadirno dhinaca nadaafada iyo xariirka bulshada , sido kale xilliyaha firaaqda .

- Haddii aan ka helno qof bukaansan guryaha waayeelada waxaa dhici karta in qofkaas gaar loo bixiyo si aan uga hortagno cudur faafinta iyo haddi aan ka shakkino qofkaas haddo codurka qabo. Suurtagalnimadaan waa tallaabo ka hortag fiican .
- Qalabaha difaaca oo daruuriga ah dhamaantooda waxey yaalaan boosaska loogo talagalay taase ayado la raacayo tallooyiinka iyo habki loo adeegsado .
- Shaqaala waxaa la siiyay tabaabar wanaagsan oo dheeraad ah ee ku saabsan xagga nadaafada .
- Howlaha nadiifinta add baa loo adkeeyay .

Waan sii wadaynaa iyo waan sii xoojinaynaa shaqooyinka degmada si ann uga shaqaysiino shaqaalo iyo waxaan istticmaalayna nidaamka shaqaynsiinta sacadaha(timvikarier) si ann u hubino daryeel wanaagsan mustaqbalka .
Wadashaqayn dhow iyo xiriir maalmeed ayaan la leenahay xaruunta caafimaadka (österbymö) si aan ula xiriirno dhaqaatiirta iyo qaybta shaybaarka dhiiga.
carrurta - iyo waxbarashda : waan sii wadei doona shaqo bixinta (shaqaalaha iyo kuwa ku shaqeeyaan nidaamka saacadaha) si loo hubiyo in howlaha u socon karaan sida caadiga ah .
tussale ku tusaya tallaboyiinka laga hergiliyay skuulada:

- Qybaha wexey leeyihiin subasx walbo kulanno si ey uga hadlaan ka maqanaashada shaqada (shaqaalaha, carruurta iyo ardayda) iyo si loo xaliyo howlaha deqmada .
- Waxaa jiro hab cusub oo loo isticmaalay qolka cuntada (maqaayda skuulka) iyo fasalalka ,waa in kuraasta u dhaxeeso masaafad weyn ama ballaaran.
- Casharada ciyaaraha waxaa lagu qaban doona bannaanka .
- Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa howlo ballaaneed badan.
- Ardydua in la ogeysiiyo wanaaga nadaafada gacmaha iyo muhiimada ey leedahay in u dhaxeeyso masaafad ardayda dhaxdooda .
- In lagu rakibo unugyada / gaybaha ka la duwan tabbeelleyaal ku qoran macluumaad ku saabsan wanaaga nadaafda gacmaha.
- Skuulka wuxu u dirayaa guriga warqad oo macluumaad ah eyna ku qorantahay luqado kala duwan.

Maareeynta dugsiga wuxu u qorshaynayaa haddi dowlada go'aan ay gaarto in skuulka la xiro .

Ardyda (8-9) waxaa loo qaybinayaa kombiyuutaro, sidoo kale ardayda 7aadka haddi baahi loo qabo waxbarashada fogaannta . Waxaa dhici kartaa in la adeegsado brograamka (GOOGLE HANGOUT) .

Dugsiga xannanda iyo dugsiga xilli firaaqaha

Si aan awood u lahaano waxaan la diyaarinaynaa shagaalaha howlaha kala duwan, iyo si aan u hubino in dugsiga xannaanada iyo dugsiga xilli firaaqaha howlahooda ey u wadan karaan . Waxaa laga yaaba in howlaha qaarkooda dib u habayn lagu sameeyo.
Laga bilaabo lixda abriil (6/4) waxaan ku sameyn doona xannanoyiinka iyo dugsiga xilli firaaqaha gudahooda ee ku yaalaan magaalada (ASBY) dib u habayn ku meel gaar ah . Carrurta ku nool (österbymö, Hestra) wey ka dhigan karaan xannanooyiinka iyo dugsiga xilli firaaqaha ku yaalaan magaaladooda.

- Xannanada waa in si wanaagsan u fulisaa hababka nadaafda cusub iyo taxaddar dheeraad ah in ey ku suubisa nadafada gacmaha (ilmaha iyo shaqaalaha) .
- Xannanada waa in ey siisa daawada gacanta (handsprit) mudnaan khaas ah.
- Mas'uulka cunuga wuxuu ku akaanayaa ilbaabka xannaanda marki cunugiisa oo keenayo/ wadanaayo .
- Wada hadalka horumarinta cunuga waxaa lagu qabanayaa taleefan ahaan ama xannaanda blaankeeda.

Siyaasiyiinta degmada : si loo yareeyo faafitaanka cudurka , waxaan joojinaynaa kulamada ama dib baan u dhigayna . Beddelkeedana waxaan isticmaali doona shirarka fiidiyowga (skype) sido kale koobitaankaan wuxuu khuseeyaa soo bandhiga arrimaha kale. Shiririka gudiyada iyo kulanada maamulayaasha waa la qabanayaa waxxana lagu qaban doona xildhibaano xaddidan , waxaana dhici karto in u hal xildhibaan go'aan u qaato.

Adeega iyo isgaarsiinta cuntada :

Dukaamada (Asby,Rydsnäs iyo Österbymo) waxey ey nidaaminayaan isgaarsiinta cuntada guriga dadweynaha iyo dadka dagan guryaha fasaxa ku yaalaan degmada (Ydre). Tani waa hal qaab lagu yareeyo halista faafitaanka cudurka in laga helo degaankeyna, waxeyna shaqaynaysaa hadda ilaa 15/6-2020.
Ballansashada iyo macluumaad siyaado ah ku saabsan isgaarsiinta iyo lacag bixinta la xiriir dukaamadaan taleefanahooda ama emaylkooda :

1. Asby lanthandel 0140-80022 ama info@asbylanthandel.se
2. Rydsnäs lanthandel 0381-50007 ama info@rydsnaslanthandel.se
3. Coop Österbymo 0381-777990 ama coop.osterbymo@kfgota.se

Halkaan waxaad ka heli karta macluumaadka degmada: webka internetka (www.ydre.se) iyo facebooga degmada waxaad ka heli karta macluumaad ku saabsan karoona fayruus iyo (covid-19) , iyo wax yaale kale (hayada caafimaadka, macluumad ku saabsan xaaladaha adag ama dhibaatooyika iyo daryeelka caafimaadka 1177). Talooyiinka ku saabsan si loo yareen lahaa faafitaanka cudurka iyo gacan dhaqida sida saxda ah waxey ku qorantahay tabeelayaal ama sabuurado lagu ғakibay degmada banaankeda , macluumaadkas waxaa lagu qoray luqado kala duwan.

Warbixinta : haddad suaalo qabtid la xariir xafiiska degmada(0381-661200) ama (ydre.kommun@ydre.se) .

La soco macluumaadka webka / facebooga degmada.

Xasuusnow in aan is caawino !

Caawi daraskaada waayeelka ah !

maareynta degmada

gaddomiyaha degmada ydre. Elisabet Hagström .

Madaxweynah degmada ydre : Ann Charlotte Gremar Engdahl